**Hawlgalka Kaalmaynta Qaramada Midoobay ee Soomaaliya (UNSOM)**

**Xafiiska Kaalmaynta Qaramada Midoobey ee Soomaaliya (UNSOM)**

# Warbixin uu Golaha Ammaanka u jeediyey Danjire Nicholas Kay, Ergayga Gaarka ah ee Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobey u qaabilsan Soomaaliya

**19 Maajo 2015**

[Sida loo Jeediyey]

Addis-Ababa- Marwo Madaxwayne, Waad ku mahadsan tahay fursaddan aad ii siisay xog-siinta Golaha. Waan ku faraxsan ahay inaan sidaas la sameeyo saaxiibkay, Danjire Maman Sidikou. Shalay ayaanu arrintan warbixin ka siinnay Golaha Nabadda iyo Amniga ee AU-da, waana sababta aan Adis Ababa idinkaga soo biirayno. Iskaashiga AU-QM ee Soomaaliya waa mid naadir ah, xooggan oo lama huraan u ah guusha la higsanayo.

Marwo Madaxwayne,

Aan ku bilaabo inaan Golaha uga mahadceliyo taageerada joogtada ah ee ay siiyaan UNSOM iyo geeddi-socodka nabadda iyo dowlad-dhisidda Soomaaliya.

Markii aan idinla hadlay bishii Febraayo waan ku farxay sidoo kalena ka welwelsanaa sanadka soo socda. Dhowrkii bilood ee la soo dhaafay waxay iftiimiyeen horumarka iyo caqabadaha jira.

Aad ayaan u farxay sababtoo ah, hakad dheer kaddib, waxaa jirtey rajo ku saabsan horumar siyaasadeed mar kale. Runtiina, xowligii ayaa dib usoo laabtay. Xukuumaddii Saddexaad ee Soomaaliya wax ka yar saddex sano gudohood ayaa si adag u shaqeysa, waxaana Baarlamaanka Federaalka ihi uu bilaabay kalfadhiga 2015-ka.

Madaxda Dowladda Federaalka, kuwa Maamul-goboleedyada iyo kuwa maxalliga ah ee Soomaaliya, xildhibaannada, iyo dhammaan qaybaha kala duwan ee bulshada ayaa si tillaabo tillaabo ah u dhisaya dowlad federaal ah, iyadoo loo marayo wadahadal iyo dib u heshiisiin. Jawiga ka dhalshay kalsooni darradii ururaysey in ka badan 25 sano ayaa se howsha ka dhigaya mid adag oo dhib badan; laakiin waa inay sii socotaa, waxayna mudan tahay taageero joogta ah.

Madaxwaynaha Dowladda Federaalka ah ee Soomaaliya, Xasan Sheekh Maxamuud, iyo sidoo kale Ra'iisul Wasaaraha, Guddoomiyaha Baarlamaanka iyo Madaxda Maamullada Puntland, Jubba iyo Koonfur Galbeed, ayaa ku celceliyey in ay ka go'an tahay in la gaarsiiyo qorshaha Higsiga 2016-ka ee Soomaaliya, iyadoo aan wax waqti kororsi ah loo samayn Baarlamaanka Federaalka iyo Madaxwaynaha bisha Agoosto. iyo Sebtembar 2016-ka siday u kala horreeyaan.

Waxaa jira dhowr bartilmaameed oo muhiim ah oo ay dowladdu u dejisey bilaha soo socda, kuwaas oo ay ku jiraan: dhamaystirka dhismaha Maamul-goboleedyada iyo golayaasha ku meel gaarka ah; horumarinta dib u eegista Dastuurka; dhisidda Guddiga Madaxa-bannaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Guddiga Xuduudaha iyo Federaalka; iyo dhamaystirka sharciga mudnaanta leh ee xisbiyada siyaasadda, arrimaha dhalashada, iyo doorashooyinka.

Marka uu baarlamaanku ansixiyo magacaabista Guddoomiyeyaasha Guddiga Madaxa-bannaan ee Doorashooyinka Qaranka, GMDQ waxa uu wajahayaa jadwal ciriiri ah si uu waajibaadkiisa u guto. Marka la dhiso guddigu waxa uu u baahan doonaa in uu si deg deg ah u go'aansado sidii uu u fulin lahaa waajibaadkiisa shaqo.

Qaramada Midoobey waxay diri doontaa Ergada Qiimaynta Doorashada si ay ugala taliyaan, una go'aamiyaan, iyagoo iskaashi dhow la yeelanaya dhinacyada ay khusayso, nooca iyo baaxadda taageerada Qaramada Midoobey ee Soomaaliya.

QM, oo ay wehliyaan Midowga Afrika, IGAD, Midowga Yurub iyo maamullada xubnaha ka ihi waxay sii wadaan inay taageeraan dhismaha Maamul-goboleedyada KMG ah. Caqabado badan ayaa weli taagan – gaar ahaan xaqiijinta ka qaybgalka. Wax badan ayaa loo baahan yahay in laga gaaro dib u heshiisiin maxalli ah.

Haweenka, dadka laga tirada badan yahay iyo dhallinyarada waa in si wanaagsan loogu soo bandhigaa taasoo qayb ka ah ka qaybgalka. Horumarka laga gaarey federaalku lama barbar dhigin horumar la mid ah oo laga sameeyey geeddi-socodka dib-u-eegista dastuurka. 6-dii bishii Maajo waxaa is casilay Guddoomiyihii Guddiga Madaxa-bannaan ee Dib u Eegista iyo Hirgelinta Dastuurka, balse waa in aan laga daalin in howsha horay loo sii wado.

Qaramada Midoobey waxay taageeraysaa Guddiyada iyo hay'adaha kale ee ay khusayso si ay si dhab ah ugu bilaabaan geeddi-socodka dib-u-eegista Dastuurka iyada oo aan dib loo dhigaynin. Waxa kale oo aan ka walaacsan ahay jadwalka doorashada “Somaliland” oo ku beegan bisha soo socota.

Go'aankii dhowaan kasoo baxay Golaha Guurtida ee ahaa in doorashada dib loo dhigo 22 bilood ilaa Maarso 2017-ka waa niyad jab. Qaramada Midoobey waxay ku biirtay saaxiibada kale ee caalamiga ah ee ku boorrinaysa in laga heshiiyo jadwalkan taas oo ku salaysan is-afgarad siyaasadeed oo dhex mara dhammaan saamilayda "Somaliland".

Marwo Madaxwayne,

Ammaanka shaqaalaha Qaramada Midoobey ee Soomaaliya ayaa weli leh mudnaanta koowaad. Weerar argagaxiso oo ka dhacay Garoowe 20-kii Abriil ayaa galaaftay nolosha afar ka mid ah shaqaalaha UNICEF iyo saddex ilaalo ah oo Soomaali ah. Al-Shabaab ayaa beegsatay shakhsiyaad aad ugu dadaalayey horumarinta nolosha carruurta iyo qoysaska Soomaaliyeed. Waxay ahayd, sida uu u yiri Madaxwayne Xasan Sheekh Maxamuud "Weerar ka dhan ah mustaqbalka dalka."

Waxaan sharfeynaa asxaabteenna dhintay innagoo shaqadooda sii wadayna. Waa inaan xaqiijinnaa isu dheelli-tirka waajibaadkeenna daryeelka shaqaalaha iyo gudashada mas'uuliyaddeenna ah inaan taageerno Soomaalida. Guud ahaan, Qaramada Midoobey - Hay'adaha, Maaliyadda iyo Barnaamijyada iyo hawlgallada kale oo la isku daray - ayaa ka dhigan in celcelis ahaan 1,400 oo qof la geeyey Soomaaliya. Waa inaan hubinnaa bixinta ilaalin ku filan ammaanka kooxahan.

Markii taa la eego, waxaan rabaa inaan uga mahadceliyo Golaha taageerada ay siiyeen ballaarinta Ciidanka Ilaalada Qaramada Midoobey, kuwaas oo ilaalin muhiim ah siiya shaqaalaha Qaramada Midoobey ee ku sugan Garoonka Diyaaradaha Caalamiga ah ee Muqdisho.

Xarunta iyo xafiisyada cusub ee aan usoo guurney ee magaalada Muqdisho. Tani waa markii ugu horreeysey oo Golaha Ammaanka uu ka howlgalo meel ka baxsan aagga garoonka tan iyo 1995-kii.

Marwo Madaxwayne,

Waxaan ka walaacsan ahay ammaanka Soomaaliya, iyo khatarta ay Al-Shabaab ku hayso gobollada kale ee dalka, taasoo uu muujinayo weerarkii foosha xumaa ee lagu qaaday Jaamacadda Gaarisa ee Kenya bishii Abriil. Waxaan u baahan nahay inaan si dhow ula socono oo aan awoodno inaan ka jawaabno calaamad kasta oo muujinaysa in Al Shabaab ay ka faa'iidaysanayaan xiriirka ay la leeyihiin kooxaha xagjirka ah ee Yemen.

Kahortagga argagixisanimadu waxay u baahan tahay dadaal dhinacyo badan leh: Waxaan rajaynayaa in toddobaadyada soo socda aan arki doonno iskaashi xitaa kii hore ka dhow oo dhexmara Maamullada xubnaha ka ah DF si wax looga qabto khatartan heer gobol, oo ay ku jiraan tillaabooyinka looga hortegayo xag-jirnimada xoogga wadata. Iyadoo wax badan oo khatara ihi ay ku jiraan hadda iyo inta laga gaarayo 2016-ka, waxaan ka filan karnaa Al-Shabaab inay sameeyaan wax kasta oo ay ku wiiqi karaan geedi-socodka siyaasadda.

Dib u cusboonaysiinta weerarrada wadajirka ah ee Soomaaliya iyo Midowga Afrika ee ka dhanka ah Al Shabaab waa mudnaan degdeg ah. Waxaan mar labaad u mahadcelinayaa geesinnimada Ciidamada Xoogga Dalka Soomaaliyeed iyo saaxiibadeenna AMISOM.

AU iyo QM ayaa dhowaan soo gebagabeeyey howlgalkii wadajirka ahaa ee Soomaaliya si ay u qiimeeyaan hal-beegyada howlgalka nabad ilaalinta Qaramada Midoobey; saamaynta ‘kor qaadista’ tirada ciidamada AMISOM, iyo in la bixiyo talooyin ku saabsan tillaabooyinka xiga ee ololaha millateriga. Saaxiibkay Danjire Sidikou iyo Ra’iisul Wasaaraha Soomaaliya ayaa warbixin xog-siin ah oo dheeraad ah ka bixin doona arrintan.

Horumarinta Ciidamada XDS iyo Booliiska Soomaaliyeed, ayaa lama huraan u ah in laga adkaado Al Shabaab iyo istiraatiijiyadda bixitaanka AMISOM. Qorshaha Guulwade (ama “Guul”) ee lagu sheegay warbixinta Xoghayaha Guud ayaa lagu doonayaa in la tababaro oo la qalabeeyo Ciidanka XDS si ay ula fuliyaan howgallo wada jir ah. Waxay bixinaysaa qaab-dhismeed wax ku ool ah; laakiin sidii caadiga ahayd wax lagu wado kuma filna in la taageero. Waxaa loo baahan yahay qaab dhismeed adag oo taageerada caalamiga ah lagu gaarsiinayo SNA, waxaanan dookhyadan kala tashanaynaa dhammaan bah-wadaagta kala duwan.

Qorshe la mid ah in loo dejiyo booliska, oo uu ku jiro booliska gobolka, ayaa sidoo kale loo baahan yahay.

Marwo Madaxwayne, waxaa la igu dhiirrigelinayaa in hab-howleedyadii la abuuray 2014-kii si loogu taageerayo hirgelinta Higsiga Cusub ee Soomaaliya ay bilaabayaan inay hirgalaan. Dowladdu waxay ku muujisay hoggaan si ay isugu keento dhammaan bah-wadaagta.

Waraaqo ka kooban 7 barnaamij, oo la jaanqaadaya mudnaanta Dowladda Federaalka iyo tas-hiilaadka deeq bixiyayaasha, isla markaana ku fariisanaya qiime ka badan $100m, ayaa loo oggolaaday in lagu daro Sanduuqa Qaramada Midoobey ee Jaalalka Badan. Waxaan u mahadcelinayaa dhammaan deeq-bixiyeyaasha ballanqaaday taageerada, waxaana ku dhiirrigelinayaa inay taageeraan soo kabashada Soomaaliya iyadoo la marayo hab-howleedyadan.

Si kastaba ha ahaatee, isku xirka iyo isku dubaridka kaalmada caalamiga ah ee ka danbaysa hoggaanka Soomaaliya waa mid aan sinnayn. Lacagaha sida deeqsinimada leh loogu yaboohay Brussels 2013-kii, kaliya toban boqolkiiba (10%) ayaa lagu soo gudbiyey qaab-dhismeedka Compact. Waxaan ku dhiirigelinayaa dhammaan saaxiibada Soomaaliya inay u hoggaansamaan ballanqaadkeenna wadajirka ah, gaar ahaan inay kordhiyaan adeegsigooda nidaamyada qaranka.

In kasta oo hannaanka maaliyadeed ee Soomaaliya uu weli yahay mid halis badan leh, haddana Dowladda Faderaalka iyo saaxiibadeeda caalamiga ihi waxay qaadayaan tillaabooyin, kuwaas oo ku dhex jira qaab-dhismeedka Higsiga Cusub, si loo hubiyo in si adag loo kormeero hab-dhismeedka dawladnimada. Weli waxaa na sugaya dhabbo dheer, waxaanse ku faraxsan ahay in aan sheego in hadda la hirgeliyey Hal Khasnad oo lacageed (Treasury Single Account), taas oo abuuraysa hal hilin oo loogu talagalay dakhliga iyo lacagaha qaranka.

Marwo Madaxwayne,

Waxaa sidoo kale jirta shaqo ku saabsan xuquuqda aadanaha. Sannadkan, Soomaaliya waxa ay u baahan doontaa in ay ka warbixiso horumarka laga sameeyey ballan-qaadyadii ay u sameeyeen Dib-u-eegista Heerka Xuquuqda Aadanaha ee dalka. Waxaan walaac ka muujinayaa in ay si aad ah u kordheen dilalka iyo xukunnada dilka ah ee la fuliyey 2015-kii, in kastoo Soomaaliya ay ka go’an tahay in la joojiyo dilalka.

Waxaan sidoo kale ka walaacsan ahay hanjabaadaha iyo caga-juglaynta lagu hayo suxufiyiinta Soomaaliya. Waxaan soo dhowaynayaa warbixinta AU-da ee ku saabsan ka faa'iidaysiga iyo tacaddiyada galmoodka ee ay gaysteen askarta AMISOM, waxaana bogaadinayaa shaqada kooxda

baarista. Sida Goluhu horey u xusay, hadda waxaa loo baahan yahay in dabagal lagu sii sameeyo. Danjire Sidikou ayaa warbixin dheer ka bixin doona arrintan.

Marwo Madaxwayne

Xaaladda bini'aadminnimo ee Soomaaliya ayaa weli ah mid laga naxo. 730,000 oo Soomaali ah ayaa weli awoodi la' inay daboolaan baahiyahooda cunto ee aasaasiga ah. Halka 2.3 milyan oo qof oo dheeraad ihi ay halis ugu jiraaan inay dhex muquurtaan

xaalad taa la mid ah. Kuwaas oo ay ka mid yihiin in ka badan 1.1 milyan oo Soomaali ah oo weli barakacsan, kuwaasoo u badan haween iyo carruur.

Xaaladdani waxay u baahan tahay feejignaan joogto ah, maalgelin ku filan iyo sidoo kale kor u qaadis joogto ah oo lagu sameeyo awoodeenna lafa-gurka iyo saadaalinta iyo nidaamyada loo baahan yahay. Saddex meelood meel sanadkan gudihiisa, Baaqa Bani'aadminnimada waxa laga maalgeliyey kaliya 12 boqolkiiba (12%), isagoo helay US$100 milyan oo Doollar oo keliya oo ka mid ah $863 milyan ee loo baahan yahay.

Waxaa kale oo xaaladda sii murjin kara roob yaraan, xirnaanshaha xawaaladaha Soomaalida iyo colaadda Yemen oo sii xoogeysatey. Laga soo bilaabo 14-kii Maajo, Soomaaliya waxaa soo gaaray 6,949 oo qof tan iyo 27-kii Maarso. Inta badan - ku dhowaad 92% - waa muwaadiniin Soomaaliyeed oo qaar badan oo ka mid ihi ay sharci qaxootinnimo ku joogeen Yemen. Qaramada Midoobey waxay si firfircoon u taageertaa dadaallada lagu caawinayo dadkaa soo laabanaya.

Marwo Madaxwayne,

Madasha Iskaashiga Heerka Sare ee la qorsheeyey 29-kii Luulyo waxay fursad u noqon doontaa in Soomaaliya iyo saaxiibadeeda ay isu yimaadaan si ay ugu heshiiyaan waxqabadyada mudnaanta hore leh inta u dhaxaysa hadda iyo 2016-ka. Laakin horumarka oo sii socda hadda iyo hadhow wuxuu u baahan doonaa feejignaan joogto ah iyo go'aan qaadasho dhinac kasta ah.

Waxaan aaminsan ahay in xilka UNSOM uu yahay mid khuseeya (xitaa) sanadka soo socda. Marka geedi-socodka federaalayntu uu horay u socdo, waxaan dib u qaabayn doonnaa diiradda dadaalkeena. Shaqadeenna gobolada Soomaaliya waxay noqon doontaa mid aad muhiim usii ah, waxaana isku dayi doonnaa inaan sare u qaadno taageerada aan siinayno maamullada jira iyo kuwa cusub, taas oo ku guda jirta waajibaadkeena ah bixinta xafiisyo wanaagsan iyo la-talin siyaasadeed oo istiraatiiji ah.

Tani waxay u baahan tahay taageero dhinacyada saadka iyo amniga  ah xilliga lagu jiro duruufo adag. Waxaan dhararayaa dib u eegis istiraatiiji ah oo ay samayso UNSOA ah oo sidoo kale loo qorsheeyey bisha Luulyo. Waxay taasi naga caawin doontaa inaan dhisno waxa muuqda oo ay ku jiraan inaan taageerno maamullada dhismaya oo UNSOM aysan joogin.

Waxaannu sii wadi doonnaa inaan ka xog-siinno Golaha haddba ku filnaanshiyaha qabanqaabinnada amniga. Ugu dambayntii, waxaanu dib u eegis ku samayn doonnaa howlaha u

diyaar-garowga doorasho ee bisha Sebtembar 2016-ka, waxaana aanu bixin doonnaa talo dheeraad ah oo ku saabsan turaanturrooyinka dhalan kara hadba sida loogu baahdo.

Marwo Madaxwayne,

Iyadoo ay weli yara deg deg tahay in loo dabaaldego guul la taaban karo oo Soomaaliya ka hana-qaadday, waxaan aaminsan ahay in aan lumin doonno fursad istiraatiji ah haddii aan ku guuldarreysanno in aan qiimeyno inta ay le'eg tahay guusha ay Soomaalida iyo beesha caalamku gaarayaan.

Marka aynu isha ku dhufanno gobolka oo dhan halkee ayaynu ku aragnaa dal, ay mar colaadi ka dhex aloosnayd, oo hadda leh dawladnimo si habsami leh u shaqaynaysa, islamarkaana wada-hadallo siyaasadeed lagu beddelayo xukunkii qoriga, iyo halka ugu muhiimsan, xag-jirnimada gacan-ka-hadalka ku dhisan oo si guuli ku dheehan tahay looga hortago.

Dal ay markii hore qaxooti ahaan uga soo carareen malaayiin dad ah oo hadda qaxooti ka soo qaxay dalal kale sida Yemen soo dhowaynaya muwaadiniintiisa. Sharaf bay ii tahay inaan ka shaqeeyo xaaladdan oo kale, iyadoo ay i wehliyaan saaxiibbada ay howshu ka go'an tahay iyo kuwa QM.

Adduunku yaanu fursadan iska lumin. Waxaan u baahan nahay inaan  guusha ku xoojinno iyadoo la kordhinayo ka qaybgalka iyo tas-hiilaadka bilaha soo socda.

Waxaan Golaha uga mahadcelinayaa taageerada joogtada ah.

Mahadsanidiin.